# Baaritaanka dhimashada ka dib

sharaaxada qoysaska

Xaashida xaqiiqada ee Royal Women's Hospital / www.thewomens.org.au

the women's
the royal women's hospital
victoria australia

*Macluumaadkaan waxaa loogu talagalay qoysaska carruurtoodu ku dhinteen Isbitaalka Royal Women's Hospital. Halka macluumaadka qaarkood ay xiriir la yeellan doonaan qoysaska kale, isbitaalada qaarkoodna ma qaadaan isla dariiqada.*

## Maxaa loo sameeyaa baaritaanka dhimashada ka dib

Ujeedadada baaritaanka dhimashadu waa in la hello sida ugu dhaqsaha badan wixii ku saabsan sababta ilmahaaga yari u dhintay ama wixii lagugu sheegay. Baaritaanku wuxuu lug ku leeyahay dib u eegista ilmahaaga taas oo uu samaynayo dhakhtar (cudur-yaqaan) takhasus ku ah mudada u dhexaysa waxyar ka hor dhalida iyo waxyar ka dib dhalida. Dhakhtarkaas wuxuu leeyahay khibrad iyo tababar khaas u ah baarista dhimashada ilmaha yar. Ilmahaaga waxaa had iyo jeer la siinayaa daryeelka iyo ixtiraamka ugu sarreeya.

Baarista dhimashada noocyadeeda oo dhan ma samayn karo Royal Women's Hospital raalinimadaada la'aanteed. Go'aankaaga waa in la diiwaangeliyaa xataa hadii aadan doonayn noocna baarista dhimashada.

Xaalladaha qaarkood, dhimashada waa in laguu xawilaa xaakimka dhimashada qaabilsan. Xaalladaani waa masuuliyada xaakimka dhimashada in uu qaban qaabiyo baarista sida ilmuhu u dhintay. Taasi waa wax aan badanaa dhicin adiga ayaana lagaala tashanaya ka hor inta aan la samayn.

Baarista dhimashada waxaa la sameeya isla marka ilmuhu dhinto. Taasi badanaa waxay dhacdaa maalin ilaa laba berri ka dib.

## Noocyada kala duwan ee baarista dhimashada

Qadarka macluumaadka ah oo ka yimid baarista dhimashada ka dib waxay ku xiran tahay nooca baarista dhimashada la doorto.

**Noocyada baarista dhimashada ka dib waa:**

***Baarista dhimashada ka dib oo buuxda***

Dhakhtarka cudurada dhalashadu wuxuu ku sameeyaa ilmahaaga baaritaan buuxa oo gudo iyo dibad ah. Baarista gudaha ahi waxay khusaynaysaa qaliin taas oo dhakhtarku si degan u soo bixinayo dhamaan qaybaha ama unugyada muhiimka ah iyo maskaxda. Qaybahaas ayaa loo baaraa si feejigan ka hor intaan la soo celin maydka (haddii aadan codsi kale samayn). Unugyo yaryar oo sambal ah ayaa la qaadaa si loo hayo. Habkaasi wuxuu bixiyaa qiimayn buuxda iyo macluumaadka ugu faahfaahsan, in kastoo ay weli dhici karto in aanu bixin sabab cad oo dhimashada keentay.

***Baaris dhimasho oo xadadan***

Qofka aqoonta u leh cudurka dhalida ka hor iyo ka dib wuxuu sameeyaa baaritaan dibada ah iyo mid xadadan oo meela mucayina oo la danaynayo. Waxaad dooran doontaa, adoo kala tashanaya dhakhtarkaaga qaybta la baarayo. Cadad (unugyo) yar ayaa lagu sameeyaa baaritaan lana dhigaa.

***Baarista dhimashada dibada ah***

Dakhtarka ama aqoonyahanka jirada dhimashada dhalida ka hor ama ka dib ayaa sameeya baaris buuxda oo dibada ah keliya. Ma jiro baaritaan gudaha ah ama unugyo sanbal laga qaadayo.

Dhamaan noocyada baarista waxaa ka mid ah x-rays, MRI (Magnetic Resonance Imaging – kuwaas oo bixiya muuqaal gudaha ah oo faahfaahsan) iyo sawiro.

***Lama samayn karo baarista dhimashada ka dib***

Waxaad dooran kartaa in aan wax baaritaana noocu doono ha ahaadee aanu samayn baaraha cudurada dhalida ka hor iyo ka dib.

**Heerka macluumaadka la hellay baarista ka dib wuxuu ku xiran yahay sida baaristu u dhamaystiran tahay, iyada oo macluumaadka badankiis ka imanayo baarista dhimashada ka dib.**

## Faaiidada iyo dhibta baarista dhimashada

***Faaiidada baarista dhimashada***

- waxay bixisaa macluumaadka sababta dhimashada ama arrinta ay tahay in laga saaro sababta dhimashada
- xaqiijinta da'da ilmahaaga
- xaqiijinta sinjiga ilmahaaga
- bixinta waqtiga saxda ah oo ilmuhu dhintay
- sharxida dhibta jireed ama hida-wadayaasha
- wuxuu sharxaa macluumaadka khatarta uurka mustaqbilka
- wuxuu bixiyaa macluumaad lagu caawimayo hooyooyinka iyo ilmaha mustaqbilka iyada oo la samaynayo baaritaan.

***Dhibta baarista dhimashada***

- baarista dhimashadu badanaa ma bixiso sababta keentay dhimashada.
- baarista dhimashadu waxay gadaal u dhigtaa qabanqaabada aaska waqtiga ay qaadanayso dhamaystirka baaritaanka dartiis. Waxaad awoodaa inaad go'aan ka gaarto in la sameeyo baaritaanada ama aad doorato in gadaal loo dhigo aaska, ama xabaalida/gubida unugyada/qaybaha jirka waqti dambe.
- marka la sameeyo baaritaan gudaha ka dib, ilmahaagu wuxuu yeelanayaa qaliin. Qaliimadaas lama dareemi karo marka ilmaha loo lebiso.
- qoysaska qaarkood waxay dareemi karaan faraqa marka ilmahooda lagu sameeyo baaritaan qaliin oo buuxa.

## Haynta unuga

Sharciyan ayaa looga baahan yahay isbitaalka inuu hayo ama kaydiyo unug kasta oo loo qaaday baarista dhimashada ka dib ama ka hor ugu yaraan 23 sanadood. Waxaa sidaas loo sameeyaa si looga jawaabo su'aal kasta oo ku saabsan baarista astayntii asalka cudurka haddii loo baahdo. Unugyada la hayaa waxay kaloo u furan yihiin cilmi baarayaasha baaraya dhimashada dhalida ka hor ama ka dib.

- cilmi baarayaashu ma isticmaali karaan unuga iyaga oo aan ka helin ogolaansho guddiga anshaxa isbitaalka
- cilmi baaristu waxaa laga yaabaa inay caawinto astaynta cudurka iyo daaweynta hooyooyinka iyo carruurta mustaqbilka.

## Go'aankaaga

Dhakhtar ayaa kula hadlaya wixii ku saabsan baarista dhimashada wuxuuna ku siinayaa fursada lagu weydiiyo su'aallo ama lagu muujiyo dareenkaaga. Waa muhiim in dhamaan su'aallahaaga laga jawaabay ka hor inta aadan go'aan ka gaarin inaad bixiso ama diido ogolaanshaaga.

Ma jirto doorasho qaldan ama saxsan go'aankaaga ugu dambeeyaana wuxuu ku xirnaan doonaa da'da ilmahaaga ama sababta keentay dhimashada. Waxay kaloo ku xirnaan doontaa waxaad qiimayso iyo waxaad aaminsan tahay.

## Baarista dhimashada ka dib

Baarista dhimashadu badanaa waxay qaadataa maalin ilaa laba maalmood oo shaqo dhimashada ka dib. Weli ilmahaaga waad arki kartaa waadna qaban kartaa waxyaallaha la samaynayo ka dib, isbitaalka dhexdiisa ama goobta agaasimaha aaska.

Dhakhtarka jirada dhalida ka dib ama ka hor ayaa qori doona warbixin uu kaga hadlayo wixii ka soo baxay baaritaankiisa. Taasi badanaa waxay qaadataa 8 ilaa 12 asbuuc. Haddii ilmahaagu ku dhashay Royal Women's Hospital, ama lagu daryeellayey goobta daryeelka ee Newborn Intensive & Special Care waxaa lagu siin doonaa ballan aad kagala hadasho natiijada dhakhtar sarre (dhakhtarka carruurta iyo uurka). Haddii kale, waxaad codsan kartaa in warbixinta loo soo diro dhakhtarkaaga uurka ama dhakhtarka guud.

## Aragtida guud

- baarista dhimashada ka dib waxay ku siinaysaa faahfaahin ku saabsan sababta ilmahaagu u dhintay.
- baarista dhimashada lama samaynayo ilaa aad bixiso ogolaansho.
- go'aankaaga ku saabsan baarista dhimashada waa in lagu diiwaangeliyaa foomka ka raalinoqoshada ee isbitaalka.
- waxaad go'aan ka gaari kartaa faahfaahin intee le'eg ayaa lagu muujinayaa baarista dhimashada.
- natiijada baarista dhimashadu waxay qaadanaysaa 8 ilaa 12 asbuuc.
- unug kasta oo la qaaday waxaa la haynayaa ilaa 23 sanadood.

**Macluumaad intaas ka badan**

Haddii aad doonayso inaad kala hadasho mid ka mid ah xaashidaan macluumaadka lagu xusay waxaad kala hadli kartaa Women's tel (03) 8345 2000 (kala hagaha telefoonka) weydiina in lagugu xiro shaqaalaha samirsiinta ama baroordiiqa, ama waaxda/meesha ku daryeelaysay. Macluumaad ku saabsan xaakimka baarista dhimasahada wac Xafiiska Xaakimka Dhimashada Dawlad Goboleedka (State Coroner's Office) tel: 1300 309 519.

**Isbitaalka The Womens waa isbitaal ka reeban sigaarka. Macluumaad intaas ka badan wixii kaalmo ahna booqo www.quit.org.au**

**Afeef Isbitaalka** The Royal Womens Hospital kama aqbalayo qofna wax masuuliyad ah macluumaadka ama talada (ama isticmaalida macluumaadka ama talada) lagu bixiyey xaashidaan macluumaadka ama lagu xusay marjac ahaan. Waxaanu u bixinay macluumaadkaan annaga oo fahamsan in dhamaan dadka isticmaalaya ay qaadayaan masuuliyada hubinteeda iyo helideeda. Dumarka waxaa lagu dhiirigelinayaa inay kala hadlaan baahidooda caafimaadka dhakhtarka caafimaadka. Haddii aad dareen ka qabto caafimaadkaaga, waa inaad la tashataa kuwa bixiya daryeelka caafimaadkaaga ama haddii aad u baahan tahay daryeel degdeg ah waa inaad aadaa isbitaalka kuugu dhow Waaxda Xaalladaha Degdegta ah. © The Royal Women's Hospital, May 2008